

Xeerka lamba. 46 rep

Xeer Nidaamiha ee ku saabsan howlaha Guddiga Maamulka.

MAAMULKA WASAAYADDA TALYAANIGA EE SOMALIYA

MAAMULAHAA

Kadib marki la arkay dekreetada Madaxweynaha Jamhuuriyada lamba. 2357, 2358 ee 9 Disember 1952;

Kadib markii la arkay DA. lamba. 8 ee 2 Febaraayo 1953 ee la xiiira dhismaha Guddiga Maamulka;

Kadib la garoowsaday baahida loo qabo in la soo saaro xeera nidaamiha hab sami u socodka howlaha Guddiga sida ku cad qod 4 ee Xeerka lamb 8 ee 2 Febaraayo 1953;

WAXAA LA AMRAY

Qod. 1

Guddiga Maamulku waa xubin la-talin ah ee Maamulaha Guud oo bixin doono aragtiyada khuseeya arrimaha ku qoran Dekreetoyinka Madaxweynha Jamhuuriyada lamba. 2357 iyo 2358 ee 9 Disember 1952:

1) Qorsheynta horumarinta siyaasadeed, bulshadeed ee Somaliya, xeerka, misaaniyaada hor dhaca ah iyo kan la soo dhaafay, (qod. 13 DP lamba. 2357), wareenjinta xisabaadka, wax ka beddelka misaaniyada guud (qod. DP 4 ee 2358)

2) Adeegyada dhaqaale oo misaaniyadeedu ay ka badan tahay So 25.000; heshiisyada gaarka ah oo dhaqaale ahaan aan ka badneyn So. 50.000, heshiisyada aan ka badneyn So 100.000 kadib xaraash, heshiisyada tartanka guud oo aan ka badnayn ilaa So 200,000 (qod. 15 ee DP 2358), kharajka Maamulku uu ku galay dalka Talyaaniga sida qalab xafiisyada ama adeegya kale oo ay hey'adaha dowliga ay qaban doonaan, iyado xatta ka hor imaan kara amarada sare ku xusan lakiin dhowri doona xeerar ugu dalka Talyaniga (qod. q6 DP lamba. 2358);

3) Muranka ka dhasha dabaqidda ciqaabka ku xeeran heshiisyada am aka hortegi doono go'aanno maxkamadeed, kuwaas oo aan ka badnaan Karin ilaa So 3.000 (qod. 21 ee 2358);

4) Baabi'inta dakhliga aan weli la qaadanin oo loo aqoonsada aamah aan la baajin Karin oo aan ka badnaan Karin So 3,000 (qod. 21 DP 2358);

5) U fassaxida qeypta qasnadda dhaqdhaaq oo loo baahan yahay si ku meel gaar ah, haddii aysan jirin xeerar kale ama heshiisyo hey'adaha kale oo u oggolan karo (qod. 38 DP 2358);

6) Amarrada lagu caddeyn doono mas'uuliyadda saraakiisha kadib markii dhibaato Maamulka ha ahaato mid ku yimid dayac ama dhowris la'aanta wajiibaadka saaran markii ay gudanayaan shaqadoodaada (qod. 13 DP 2358);

Guddigu wuxuu talo ka bixin doonaa arrimaha kale oo uu Maamuluhu ka codsado.

Qod. 2

Arrin kasto ee la horgeynaaya Guddiga waa in marka hore oo uu Madaxa Xafiiska ku diyaariyo qaab warbixin ah isagoo tilmaamayo qodobada oo uu saldhig ugaga dhigaayo. Waxaa kale oo wehli doonaa qorallada loo baahan yahay si loo guda galoo baarista arrinta.

Qod. 3

Arrin kasta ee la hor keeno Guddiga, Guddomiyuhu wuxuu u magacaabi doona xubin warbixiye an oo xoghaye taakuleyn doono.

Arrimaha si gaar u baahan in loo baaro, Guddomiyuhu wuxuu magacabi doona guddi hoosad ah oo ka kooban xubno Guddiga ama khuburo aan ka mid ahayn Guddiga.

Cidda u xilsaaranbaarista arrinta la horkeenay Guddiga, ha ahaato hal xubin, ama guddi hoosad ama Guddomiyaha Guddiga waxaay awood u leeyihiin in ay weydistaan qorollo dheeraad aha haddii loo baahdo.

Qod. 4

Kadib markii laga reebo marxaladaha deg-deg ah, wuxuu Guddomiyaha Guddiga isu yeeri kara shir, isaga oo takuuleyn ka helay xogħaya, xubnaha Guddiga muddo 2 beri gudahooda.

Ogeysiska isu yeeridda shirkha waa in uu tilmaama arrimaha laga hadli doono. Haddii ay marxalad deg deg ah jirto Guddomiyuhu wuxuu amri kara in laga hadlo arrimo aanan horay lagu soo qorin ogeysiiska.

Qod. 5

Si uu ansax u noqdo go'aanka shirku waa in ay soo xaadiran tiro badan ee xubnaha iyo Guddomiyaha Guddiga.

Qod. 6

Shirkasta oo la isugu yimaado waa in laga qoraa warbixin ay saxiixaan Guddomiyaha iyo xogħayha.

Qod. 7

Haddii ay suurto geli weyso in si ku meel gaar ah ay soo xaadiri waayaan Guddomiyaha iyo Xogħayaha Guud sida ku cad faqradda ugu dambeysa ee qod 13 ee DP 2357 ee 9 Disember waxaa la dhigi doona shir marxalad deg-deg ah.

Waxaa Guddomiye noqon doono xubinta Guddiga oo ugu daraja sareeyso ama ugu da'da weyn sida ku cad qod. 12 ee isla dekreetadasi.

Go'aanadu waa kuwa ugu coddeyn ta badan, haddi bar bar dhac ay timaado, codka Guddomiyaha ayaa kala saari doono.

Guddomiyuhu wuxuu soo uruuri doonaa codadka xubnaha isagoo ka bilaabi doono xubnaha ugu daraja hooseeyo ma xubin ugu da'da yar, wuxuuna isago coddeyn doona ugu dambysti.

Guddomiyuhu wuxuu saxiixi karaa qoraallada ay Madaxa Xafiisyadu ay ka cadsadaan oo caadi ahaan uu Maamulaha ama Xogħayaha Guud ay saxiixi jireen.

Qod. 8

Xubnaha Guddigu waxay xaq u yeelan doonaa gunnoyinka lagu qoray xeerarka nidaamiya.

Muqdisho, 20 Maarso 1953.

Maamulaha

E. Martino